



**DAWLADDA HOOSE EE DEGMADA GAROOWE  
DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYEED**

---

**WARGELIN DAD-WEYNE**

Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe waxay ku hawlan tahay fulinta mashruuc ku saabsan horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo maamulka, gaar ahaan hirgelinta waddooyin laami ah kaas oo lagu magacaabo Mashruuca Badbaadinta Magaalooyinka Soomaaliyeed, kaas oo ay ka wada faa'iideysanayaan saddexda magaalo ee kala ah Garoowe, Hargeysa iyo Muqdisho uuna maalgelinayo Bangiga Aduunka. Ujeedooyinka mashruucan waxaa ka mid ah kobcinta dhaqan-dhaqaale iyada oo la beegsanayo horumarinayo kaabayaasha dhaqaalaha iyo xoojinta maamulka dawladdaha hoose ee dalka. Mashruucani waxa uu daba socdaa oo uu ku xiran yahay mashruuc dhawaan soo idlaaday oo ku aadanaa qiimeyn iyo falaanqeyn qoto dheer ee lagu sameeyey maalgashiga magaalooyinka Soomaaliyeed, gaar ahaan arrinta ay mudnaanta siiyeen Maamulka Degmada Garoowe ee ahaa hirgelinta waddooyin cusub oo laami ah.

Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe waxay go'aamisey in la hirgeliyo waddooyin laami ah oo dhan afar waddo kuwaas oo fududeyn doona isku socodka iyo isku xirka dadka iyo gaadiidkaba, isla markaasna ka qeyb qaadan doona koboca dhaqaalaha bulshada iyo yareynta falalka amni darada keeni kara. Afarta waddooyin ayaa kala ah: b) Waddada *General* Nuur Salaad; t) Waddada Shiikh CabdiSalaam; j) Waddada garam marta Hudheelka Sagal kana soo bilaabata Waddada Diktoor Jimcaale kuna dhammaanata Waddada Shiikh Cabdulqaadir; iyo x) Waddada Jillab.

Sidaas awgeed, Maamulka Dawladda Hoose ee Garoowe waxa uu bulshada ku nool magaalada, gaar ahaan kuwa deggan hareeraha waddooyinkaas kor ku xusan la farayaa in ay ka guraan waxyaabaha yaala hareeraha waddooyinkaas sida dhagxuunta, ciida, IWM. Sidoo kale bulshada waxaa laga rabaa in ay ka qayb qaataan soo dhaweyaan dedaalada horumineed ee ay Dawladda Hoose fulineyso si loo gaaro yoolkii lagu taamayey.

Dawladda Hoose ee Garoowe waxay asaasi doontaa guddi xalin doona cabashada bulshada, guddigaas oo ay xubno ka noqon doonaan shaqsiyaad matala dadka ay waddooyinku saameynta ku yeeshaan. Guddigaas waxa uu u kuurgeli doonaa cabashooyinka bulshada iyaga oo si qoto dheer u falaanqeyn doona nooca cabasho iyo sidii loo xalin lahaa. Guddigu waxa uu tixraacayaa xeerarka ama siyaasadaha dib u dejinta iyo magdhawga hantida dad-weynaha ee ay ansixiyeen Gollaha Sharci dejinta Dawladda Puntland iyo kuwa Bangiga Aduunka.

Waxaan idiin rajeynaynaa guul iyo barwaaqo idanka Ilaahey.

Mahadsanidiin,

Wada Shaqeyn Wacan,